




# Hagaha Xulashada Iskoollada PreK-12 ee 2026-27

Waa Xilligii la Xulan Jiray Iskool Fiican!



Codso Maanta!

Ka codso ugu dambeyn Febraayo 20, 2026 · [spps.org/apply](https://spps.org/apply)

## Tusmada Mawduucyada

**Codsiga  
Diiwaangelinta 2026-27**  
bogga 4

**Mudnaanta  
Aqbalaadda Iskoolka**  
bogga 5

**Gaadiidka Baska ee Iskoolka**  
bogga 6

**Barnaamijyada Baxo Iskoolka  
ka Hor iyo ka Dib**  
bogga 6

**Barnaamijyada u Diyaargarowga  
Kulleejka iyo Xirfadda Shaqada**  
bogga 7

**Barnaamijka Barashada  
Luuqadda Ingiriiska**  
bogga 7

**Barnaamijyada  
Carruurnimada Hore**  
bogga 8

**Adeegyada  
Waxbarashada Gaarka ah**  
bogga 9

**Khariiradda Aagga Dugsiga**  
bogga 10

**Noocyada Iskoolada  
iyo Barnaamijyada**  
bogga 12

**Jaantuuska Iskoolada**  
bogga 14

**Su'aalaha Inta  
Badan La Isweydiyo**  
bogga 25

Xogaha ku jira hagahan waa kuwii u dambeeyay laga bilaabo bisha December 2025 waana la beddeli karaa. Wixii ah xogtii ugu dambeysay, fadlan booqo [spps.org/apply](https://spps.org/apply) ama la xiriiir Xarunta Meelaynta Ardayda.

Qoysaska Qaaliga ah ee St. Paul,

Dugsi wanaagsan oo aad u doortaan ilmihiiina waa mid ka mid ah go'aamada ugu muhiimsan ee aad gaartaan ka waalid ahaan. Waa go'aan ay ka buuxaan rajo, su'aalo iyo riyoyin ku aadan mustaqbalka ubadkiina. Ka ahaan kormeeraha guud, waxaa sharaf ii ah inaad idin ku garab joogo safarkan.

Waxa aadka iiga cajabiya Dugsiyada Dadweynaha Saint Paul waa sida aan ugu awoodsiino arday kasta inuu sahmiyo hibada gaarka u ah, xiisaha iyo kartida. Haddii ubadkiina ay baraaare ku gaaraan bulsho dugsi oo aad isugu dhow ama ka soo dhalaalaan waxbarashada khaaska ah ee Montessori, isku dhafka luuqadaha, STEM ama farshaxanka, waxaan u haynaa dugsi ay ku kobci karaan.

Hadafkeenu waa mid fudud balse awood badan: inaan ku dhiirigelino ardayda inay si qoto dheer u fikiraan, raacaan riyoyinkooda oo ay beddelaan adduunka. Mid kasta oo ka mid ah dugsiyadeena wuxuu ubadkiina siinayaa taageerada ay ugu baahan yihiin inay guulaystaan, laga soo bilaabo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada ardayga barta Ingiriisiga ilaa ciyaaraha fudud, muusigga, naadiyada iyo qaar kaloo badan.

Waad ku mahadsan tahay xulashadaada Dugsiyada Dadweynaha Saint Paul. Waanu sugi la'nahay inaan adinka iyo ubadkiinaba ku soo dhawayno qoyska SPPS!

Anigoo farxad iyo raynrayn u rajaynaya safarka horteena ah,



Dr. Stacie Stanley, Kormeeraha Guud



## Yaa Codsan Karo?

### Arji ayaa loo baahan yahay haddii:

- Haddii ilmahaagu hadda ku qoran yahay SPPS oo uuna codsanayo iskool kale
- Ilmahaagu ku cusub yahay dugsiyada Saint Paul Public Schools

### Codsiyada sida caadiga ah loogama baahna ardayda:

- Sii wadanaysa iskoolkooda ay hadda dhigtaan ama ku jiro barnaamijka magnet kuwaasoo u sii gudbayso heerka fasalka xiga
- Ah arday hadda ka diiwaangashan SPPS oo galayo kindergarten, fasalka 6 ama 9, kuwaasoo raacayo dariiqa isdiiwaangelinta iskoolkooda. Si aad u eegtid dariiqyada isdiiwaangelinta iskoolada, isha mari shaxda iskoolka ee ku qoran dhammaadka hagahan.

**Codso ugu dambeyn Febraayo 20, 2026, si aad u heshid fursadda ugu fiican ee aad ku geli kartid iskoolka aad dooratay.**



# Tallaabooyinka loo Maro Xulashada Iskoolka

## Tilmaamaha Hagaha 2026-27

### Kahor Intaadan Codsan Iskool

1. Ka fiirso oo tixgeli dugsiyada leh adeegyada aad u baahan tahay iyo haddii gaadiid bas loo heli karo gurigaaga ama cinwaankaaga xannaanada. Isha mari sida barnaamijyada iskoollada xaafadda iyo kuwa magnetka ay isugu xigaan laga billaabo iskoolka hoose ilaa midka dhexe ilaa dugsiga sare.
2. Booqo [spps.org/apply](https://spps.org/apply) oo geli cinwaanka gurigaaga School Finder (goob laga raadiyo iskoollada) si aad u xaqiijisid Aaggaaga iyo Aagga Iskoolka Xaafaddaada, ka dibna akhri iskoollada aad xulan kartid.
3. Booqashada lagugu baraayo ama lagugu tusaayo iskoolka waa fursad fiican oo aad wax badan kaga ogaan kartid iskoollada aad xiisayneysid. Booqo [spps.org/openhouses](https://spps.org/openhouses) oo akhriso taariikhaha iyo wakhtiyada ee uu xilliga qaboobaha iskool walba dadweynaha u soo bandhigayo barnaamijyadiisa.
4. Booqo bogagga madaddaalada leh ee iskoolka si aad u sahamiso xogaha gaarka ah ee iskoolka.

### Codsiga Iskool

1. Ka codso onlaynka oo gal [spps.org/apply](https://spps.org/apply), ama soo buuxi arjiga oo waraaqo ah, ama booqo Xarunta Meelaynta Ardayda ee cinwaankeedu yahay 2102 University Ave. West, St. Paul, MN 55114. Codsiyada waa in la helaa ama istaambo lagu soo dhejiyaa ugu dambeyn Febraayo 20, 2026, si loogu tixgeliyo mudnaanta koowaad. Qoysaska ku soo gudbiyo arjiga taariikhda kama dambeysta ee codsiga tix-gelinta leh waxaa la ogaysiin doonaa aqbalaada, ama meelaynta liiska sugitaanka, bisha Abriil.
2. Ku qoro ilaa laba iskool codsigaaga. Iskoollada aad xulatid waxaa loo tixgelinayaa sida ay u kala horreeyaan. Ardayda aan laga aqbalin iskoolkii ahaa xulashadooda koowaad waxaa lagu dari doonaa liiska sugitaanka ee iskoolka.
3. Fadlan la soco in ardayda laga yaabo inaan laga aqbalin mid ka mid ah labada iskool ee ay doorteen, laakiin ardayda ku nool St. Paul waxaa loo ballanqaadayaa inay iska diiwaangeliyaan Dugsiga Dadweynaha ee Saint Paul ee fasallada K-12.
4. Soo buuxi codsi gaar ah oo loogu talagalay arday walba.
5. Fadlan si dhammeystiran u soo buuxi codsigaaga.

### Shuruudaha Lagu Galo Pre-Kindergarten

Marka lagu daro Aqbalidda Mudnaanta leh ee ku xusan bogga 5, tixgelinta isdiwaangelinta barnaamijka Pre-K wuxuu ku saleysan yahay kuwan soo socda:

- Ardayda ku nool St. Paul
- Ardayda afar sano jirsata ugu dambeyn Sibteembar 1, 2026
- Ardayda Barata af-Ingiriisiga
- Ardayda u qalanta cunto bilaash ah ama mid qiimo jaban (eeg shaxda hoose)
- Ardayda hela adeegyada Waxbarashada Gaarka ah ee Carruurnimada Hore (ECSE)

### Tilmaamaha Qadada Bilaashka ah/La Qiimaha-dhimay

Baaxadda Reerka	Wadarta Dakhliga Guud ee Qoyska				
	Sannadkiiba	Bishiiba	Laba Jeer Bishii	Labadii Toddobaadba Hal Mar	Toddobaadkiiba
1	\$28,953	\$2,413	\$1,207	\$1,114	\$557
2	\$39,128	\$3,261	\$1,631	\$1,505	\$753
3	\$49,303	\$4,109	\$2,055	\$1,897	\$949
4	\$59,478	\$4,957	\$2,479	\$2,288	\$1,144
5	\$69,653	\$5,805	\$2,903	\$2,679	\$1,340
6	\$79,828	\$6,653	\$3,327	\$3,071	\$1,536
7	\$90,003	\$7,501	\$3,751	\$3,462	\$1,731
8	\$100,178	\$8,349	\$4,175	\$3,853	\$1,927
<b>Xubin walba oo dheeraad ku ah tirada kore ee qoyska waxaad ku dartaa:</b>	\$10,175	\$848	\$424	\$392	\$196



**Saint Paul**  
PUBLIC SCHOOLS

**Sannad-dugsiyeedka 2026-27 Arjiga diiwaan-galinta ee Dugsiyada Dadweynaha Saint Paul: Fasallada PreK-12**  
**Arjiga oo dhamaystiran u soo dir:**  
 Xilliga Kama Dambaysta ah ee Arjiga Mudnaanta leh: Febraayo 20, 2026

Student Placement Center, 2102 University Avenue W. St. Paul, MN 55114

Magaca Sharciga ah ee Ardayga: \_\_\_\_\_ Koorwaad \_\_\_\_\_ Dhexe \_\_\_\_\_ Dambe \_\_\_\_\_

Dheddig  Lab  Luuqada Guriga  Hispanic:  Haa  Maya  Hindida Mareykanka Asalka ah  Aasiyaan

Taariikhda Dhalashada  Luuqada Guriga  Madow  Pacific Islander  Caddaan

Fasalka aad Codsanayso: \_\_\_\_\_ Iskuulka ardaygu hadda dhigto ama kii ugu dambeeyay ee uu dhigtay: \_\_\_\_\_

Ilmahaagu ma helaa adeegyada Waxbarashada Gaarka ama ma leeyahay barnaamijka IEP?  Haa  Maya

Ma aaminsantahay in ilmahaagu u qalmo cunnada lacag la'aanta ah ama qiimaheeda la dhimay (Fadlan eeg bogga tilmaamaha si aad u fahamto)?  Haa  Maya

Macuumaadka aad ku qorto foomkan ee ardayda PreK waxaa dhici karta in lala wadaago Think Small, Head Start ama Wasaarada waxbarashada ee Minnesota iyadoo looga jeedo ujeedooyin khuseeya qorshaynta barnaamijka. Haddii aadan rabin in macduumaadkaaga cidna lala wadaago, calaamadee sanduuqan.

1. Magaca Waalidka/Masuulka: \_\_\_\_\_ Magaca Koorwaad iyo kan Dambe

Xiriirka uu ardayga la leeyahay: \_\_\_\_\_

Cinwaanka Guriga: \_\_\_\_\_ Waddada Lambarka Guriga \_\_\_\_\_ (Apt#) \_\_\_\_\_ Magaalada \_\_\_\_\_ Gobolka \_\_\_\_\_ Zip Code

Taleefanka Guriga: \_\_\_\_\_ **Taleefanka Gacanta:** \_\_\_\_\_ **limaylka\*:** \_\_\_\_\_ \*limaylkan waxaa loo isticmaali doonaa xiriirka natiijada arjiga/codsiga

Waalidka/Masuulka saxda ah ma wuxuu hadda u shaqeeyaa SPPS\*\*?  Haa  Maya

Haddii haa tahay, fadlan qor magaca waalidka iyo goobta shaqada: \_\_\_\_\_ **Lambarka Shaqaalaha:** \_\_\_\_\_

2. Magaca Waalidka/Masuulka: \_\_\_\_\_ Magaca Koorwaad iyo kan Dambe

Xiriirka uu ardayga la leeyahay: \_\_\_\_\_

Cinwaanka Guriga: \_\_\_\_\_ Waddada Lambarka Guriga \_\_\_\_\_ (Apt#) \_\_\_\_\_ Magaalada \_\_\_\_\_ Gobolka \_\_\_\_\_ Zip Code

Taleefanka Guriga: \_\_\_\_\_ **Taleefanka Gacanta:** \_\_\_\_\_ **limaylka:** \_\_\_\_\_

Waalidka/Masuulka saxda ah ma wuxuu hadda u shaqeeyaa SPPS\*\*?  Haa  Maya

Haddii haa tahay, fadlan qor magaca waalidka iyo goobta shaqada: \_\_\_\_\_ **Lambarka Shaqaalaha:** \_\_\_\_\_

\*\*Fadlan booqo [spps.org/apply](https://spps.org/apply) ama Tasmada Xulashada Iskoolada ka Firi Tixgelinta Qaaska ee Shaqaalaha

\*\*Fadlan booqo [spps.org/apply](https://spps.org/apply) ama Tasmada Xulashada Iskoolada ka Firi Tixgelinta Qaaska ee Shaqaalaha

**Goob kale/Cinwaanka goobta lagu xanaaneeyo ilmaha (hadday ka duwantahay cinwaanka guriga)**  
Macuumaadkan waxaa loo isticmaali doonaa gaadiid-siinta ardayga oo kaliya. Mudnaanta diiwaan-galinta waxaa lagu saleeyaa cinwaanka guriga oo kaliya.

**Cinwaanka goobta laga qaadayo ilmaha:** \_\_\_\_\_ Waddada Lambarka Guriga \_\_\_\_\_ (Apt#) \_\_\_\_\_ Magaalada \_\_\_\_\_ Gobolka \_\_\_\_\_ Zip Code

**Qofka lagala xiriirayo goobta laga qaadayo ilmaha:** \_\_\_\_\_ **Taleefanka goobta laga qaadayo ilmaha:** \_\_\_\_\_

Cinwaanka goobta la keenayo ilmaha: \_\_\_\_\_ Waddada Lambarka Guriga \_\_\_\_\_ (Apt#) \_\_\_\_\_ Magaalada \_\_\_\_\_ Gobolka \_\_\_\_\_ Zip Code

**Qofka lagala xiriirayo goobta la keenayo ilmaha:** \_\_\_\_\_ **Taleefanka goobta la keenayo ilmaha:** \_\_\_\_\_

**XULASHADA ISKOOLKA**

1-aad: \_\_\_\_\_  
*Iskuulka & Barnaamijka ah doorashadaada 1'aad*

Magaca/dhalashada walaalka hadda dhigto iskoolkan \_\_\_\_\_

2-aad: \_\_\_\_\_  
*Iskuulka & Barnaamijka ah doorashadaada 2'aad*

Magaca/dhalashada walaalka hadda dhigto iskoolkan \_\_\_\_\_

**AKHRI OO SAXIIX INTAADAN SOO GUDBIN KA HOR**

- Waxaan fahamsanahay in aan anigu u diyaariyo ilmahaaga gaadiidka uu ku tagi lahaa iskuulka haddii aan doorto inaan ka diwaan galiyo meel ka baxsan aagga nalloo cayimay.
- Waxaan fahamsanahay haddii ilmahaaga aan u doorto ka qayb galka barnaamij gooni ah, in laga diwaan galinayo koorsooyinka ka horreeya barnaamijka isaga ah. Hadday xaaladani is beddesho, waxaan fahamsanahay in aniga ay WAAJIB igu tahay in ilmahaaga aan u diyaariyo gaadiid ama aan u soo beddelo iskuulka xaafadda.
- Waxaan fahamsanahay marar badan oo ilmahaagu soo daaho ama maqaanshahiisu bato inay dhici karto in la iga dalban karo inaan ilmahaaga ka diwaan galiyo iskuul kale oo ku yaalla xaafadda aan degganahay.

**Saxiixa Waalidka/Masuulka Taariikhda**

**FOR OFFICE USE ONLY**

Student ID: \_\_\_\_\_ Date received: \_\_\_\_\_

Area: \_\_\_\_\_ CSZ: \_\_\_\_\_

Admission Criteria:  Program Check:  Sibling:

Age/grade check:  Employee:  Twin ID: \_\_\_\_\_

EA to K:  GT:  SpEd:

NOTES: \_\_\_\_\_

# Mudnaanta Aqbalaadda Iskoolada

Xilliga lagu jiro hannaanka isdiiwaangelinta, codsiga ardayda waxaa loo saaraa miisaan ku saleysan dhowr qodob oo qaadashada lagu go'aamiyo (oo loo yaqaan mudnaanta qaadashada) ka hor inta aan laga aqbalin iskool. Mudnaantu dammaanad uma ahan aqbalidda arjiga.

	Pre-Kindergarten	Dugsi Hoose			Dugsiyada Dhexe iyo Dugsiyada Sare	
		Iskoolada Xaafadda	Magnet-ka Heer Deegaan	Magnet-ka Heer Degmo		
Mudnaanta	1	Iskoolka Aagga Xaafadda	Iskoolka Aagga Xaafadda	Magnet ku yaalla Deegaanka	Ka Tarjumayo St. Paul	Magnet/Dariiqada Isdiiwaangelinta ee Iskoolada Kale
	2	Aagga	Ka Tarjumayo St. Paul	Ka Tarjumayo St. Paul	Tixgelinta Shaqaalaha	Aagga
	3	Magnet ku yaalla Deegaanka	Tixgelinta Shaqaalaha	Tixgelinta Shaqaalaha	Dugsi Magnet Degmo	Tixgelinta Shaqaalaha
	4	Dugsi Magnet Degmo	Aagga	Dugsi Magnet Degmo	Ka baxsan Degmada	Magnet ku yaalla Deegaanka
	5	Ka baxsan Degmada	Dugsi Magnet Degmo	Ka baxsan Degmada		Dugsi Magnet Degmo
	6		Ka baxsan Degmada			Ka baxsan Degmada

\*Fadlan ogow: Dhammaan barnaamijyada farbaradka hore pre-K mudnaanta isdiiwaangelinta ee la siiyo waa in ardeydu xaq u yeelato cunto bilaash ah ama lacagta laga yareeyo, luuqad kale oo aan ahayn Ingiriis inay ku hadlaan guryahooda iyo/ama baahidooda adeegyada waxbarashada.

\*\* Xulashada walaalaha waxay ka mid tahay qayb walba oo mudnaanta goonida ah leh.

## Faahfaahinta Arrimaha Mudnaanta

**Aagga:** Mudnaanta waxaa la siiyaa ardeyda ku nool meelo cayiman (A-F), laakiin ka baxsan Aagga Iskoolka Xaafadda.

**Iskuulka Ugu Dhow Xaafadda:** Dhawaanshaha wuxuu khuseeyaa ardeyda dugsiyada hoose oo dhan. Mudnaanta waxaa la siiyaa ardeyda ku nool agagaaraha Iskuulka Ugu Dhow Xaafadda si ay arday badan oo isku xaafad ah iskuulka u wada dhigtaan.

**Dugsi Magnet Degmo:** Mudnaanta waxaa la siiyaa qoysaska St. Paul ee soo codsada iskuul loo aqoonsan yahay in uu degmada u yahay magnet.

**Tixgelinta Shaqaalaha:** Mudnaan ayay helayaan dhammaan carruurta shaqaalaha hadda jooga degmada SPPS (shaqaalaha ku meel gaarka ah iyo qandaraaslayaasha/iibiyayaasha uma qalmaan). Barnaamijyada Pre-K iyo iskoolka Capitol Hill kuma jiraan tixgelintan mudnaanta leh. Dugsiyada gaaray heerka saboolnimada ee ah boqolkiiba 50 ama ka yar ayaa sidoo kale laga saarayaa tixgelintan mudnaanta leh.

Liiska iskoolada laga reebay tixgelinta shaqaalaha ee 2026-27 waxaa ka mid ah Adams Spanish Immersion, Barack and Michelle Obama Montessori Central Sr. High, Chelsea Heights, EXPO, Groveland Park, Hidden River Middle, Highland Park Middle, Highland Park Sr. High, Horace Mann, Jie Ming Mandarin Immersion, L'Etoile du Nord French Immersion, Open World Learning, Randolph Heights iyo St. Anthony Park.

**Ka baxsan Degmada:** Ardeyda ku nool meelaha ka baxsan magaalada St. Paul waxaa iskuullada degmada loo oggol yahay marka boos loo hayo. Ardayda ka baxsan xaafadaha degmada ma helayaan gaadiidka basaska.

**Magaalada St. Paul:** Mudnaanta oggolaanshahan waa mid ku saleysan cinwaanka deegaanka ugu baahida badan. Xaafadaha qeexiddeedu waa tirada dadka deggan ee xaq u yeesha qado bilaash

ah ama lacagta laga yareeyey; ee ku hadla luuqad aan Ingiriis ahayn; iyo natiijoyinka imtixaamaadka hooseeya ee wax-akhriska iyo xisaabta ardeyda xaafadahaas.

Ilaa 25 boqolkiiba kuraasta la heli karo ee dugsiyadan hoose ee leh heer faqri oo hoose ayaa loo qoondeyn doonaa ardayda deggan xaafadaha baahiyada badani ka jiraan. Dugsiyadan waxaa ka mid ah: Adams Spanish Immersion, Barack and Michelle Obama Montessori, Capitol Hill Gifted and Talented, Chelsea Heights, EXPO, Groveland Park, Horace Mann, Jie Ming Mandarin Immersion, L'Etoile du Nord French Immersion, Randolph Heights iyo St. Anthony Park.

Wixii faahfaahin dheeraad ah fadlan kala soo xiriiir 651-632-3760 Xarunta Meelaynta Ardeyda ee Student Placement Center.

**Magnet ku yaalla Deegaanka:** Mudnaanta waxaa la siiyaa ardeyda codsanaya iskuul loo aqoonsan yahay in uu cinwaankooda u yahay midka ardeyda maskaxda badan ama magnet.

**Walaalo:** Codsii in la soo buuxiyo ayaa laga rabaa dhammaan ardeyda ku cusub dugsiyada dadweynaha ee Saint Paul Public Schools ama iskoolada beddelanaya. Ardeyda walaalaha ah ee hadda dhigata iskuul ay soo codsadeen mudnaanta la siinayo waxaa loo eegayaa shuruudaha qoran, haddii aan wax gaar ah loo sheegin. Si aad xaq ugu yeelatid mudnaanta la siiyo walaalaha, waa inuu jiro ilmo ka diiwaangashan iskuulka la codsanayo xilliga lagu jiro sannad dugsiyeedka 2025-26 iyadoo uu ardeygaasi sii dhigan doono iskuulkaas sannadka 2026-27.

## Fadlan ogow:

- Mudnaanta walaalaha dammaanad uma aha in la helayo aqbalaadda iskuulka.
- Walaaluhu waa in ay yihiin carruur isku-waalid ah ama isku-masuul ah oo isla markaana ku wada nool isku guri ama isku cinwaan.
- Mudnaanta isdiiwaangelinta iyo iskuulka intuu qaban karo waxaa la tixgaliyaa ka hor intaan la eegin mudnaanta walaalaha.

# Gaadiidka Baska ee Iskoolka



Ka eeg khariiradda bogga 10 ama waxaad ka heleysaa bogga School Finder ee [spps.org/apply](https://spps.org/apply) si aad u aragtid iskoollada Deegaankaaga. Fadlan ogow in iskoollada bulshada, kuwa magnet-ka heer xaafad, iyo heer degmo ay leeyihiin Aagag kala duwan oo loogu talagalay gaadiidka.

## Tilmaamaha Gaadiidka

Gaadiidka ayaa laga yaabaa in loo helo ardayda ku nool St. Paul. Ardayda u qalma waxaa lagu qoraa baska iyadoo lagu saleynayo cinwaanka gurigooda ama cinwaanka xannaanada carruurta.

**Fasalada PreK-5:** Gaadiidka basaska iskoolka waxaa loo heli karaa ardayda ku nool in ka badan meel nus mayl u jirta iskoolka. Tan waxaa ka mid ah ardayda dhigato fasallada PreK-5 ee ku jiro iskoollada PreK-8.

**Fasallada 6-12:** Basaska iskoolka ama gaadiidka Metro Transit ayaa loo heli karaa ardayda ku nool in ka badan hal mayl meel u jirta iskoolka. Tan waxaa ka mid ah ardayda dhigato fasallada 6-8 ee ku jirto iskoollada 6-12 iyo PreK-8.

**Waxbarashada Gaarka ah:** Barnaamijka Waxbarashada Shakhsi ahaaneed (IEP) waa inuu caddeeyaa baahida gaadiidka ee arday walba. Kooxda IEP ayaa go'aamin doona baahida gaarka ah ee uu ardaygu u qabo gaadiidka waxbarashada gaarka ah markii la bixinayo Waxbarashada Dadwaynaha Ku Habboon ee Bilaashka ah (FAPE). Waaliddiintu waa inay kala hadlaan wixii faahfaahin ah ee la xiriiro gaadiidka kooxda qaabilsan kiiska IEP ee ilmahooda.

**Fadlan ogow:** Haddii aad codsato iskool ka baxsan Aaggaaga, Aagga Dugsiga Bulshada ama Aagga magnetka loo qorsheeyay, waa inaad saxiixdid warqad ah inaan lagu heli karin gaadiidka adigoo qiraya in gaadiidka baska aan lagu heli karin iyo in ilmahaaga aad adigu geyn doontid, kana soo celin doontid, iskoolka (laga reebo haddii uu ardaygaagu u qalmo gaadiidka ka baxsan deegaanka taasoo lagu qoray galkiisa IEP).

## Gaadiidka Metro Transit

Ardayda dhigata fasallada 9-12 ee dugsiyada Creative Arts Secondary, Gateway to College, Gordon Parks High School iyo Johnson Senior High School waxay isticmaalaan Metro Transit halkii ay ka raaci lahaayeen basaska iskoolka si ay u aadaan, uguna soo noqdaan, iskoolka. Ardayda u qalma gaadiidka ee dugsiyadaas dhigto waxay heli doonaan kaarka ardayda (Student Pass) ee Metro Transit oo bilaash ah toddobaadka ugu horreeya ee iskoolka.

Booqo [spps.org/transportation](https://spps.org/transportation) ama wac 651-696-9600 wixii xog dheeraad ah.

# Barnaamijyada Baxo Iskoolka Ka Hor iyo Ka Dib

SPPS waxay bixisaa barnaamijyo kala duwan ka hor iyo ka dib saacadaha iskoolka iyadoo bixinayso daryeelka carruurta, kobcinta tacliinta, hawlaha waxbarashada dheeraadka ku ah iyo ciyaaraha fudud kuwaasoo loogu talagalay inay helaan qoysaska sannad-dugsiyeedka oo dhan. Fiiri tusaalooyinka qaar ka mid ah hawlaha iyo barnaamijyada la heli karo ee hoose oo hubi inaad booqatid bogga iskoolkaaga si aad u hesho liiska ugu saxsan ee barnaamijyada iskoolka aad rabtid.

Dugsi Hoose	Dugsi Dhexe	Dugsi Sare
<p><b>Waxbarashada Bulshada:</b> fasallada shaxda, luuqadaha adduunka, qoob ka ciyaarka, tiyaatarka, farshaxanka iyo in ka badan; 651-767-8179, <a href="https://spps.org/ce_youth">spps.org/ce_youth</a></p> <p><b>Discovery Club:</b> daryeelka carruurta oo lacag ah kaasoo la helo ka hor iyo ka dib saacadaha iskoolka; 651-632-3793, <a href="https://spps.org/discoveryclub">spps.org/discoveryclub</a></p> <p><b>Maalinta Saacadaha Dheeraadka ah ee Waxbarashada (EDL):</b> taageerada tacliinta iyo hawlaha waxbarashada; <a href="https://spps.org/alted">spps.org/alted</a></p> <p><b>Freedom School Express:</b> duruusta dhaqan ahaan habboon iyo hawlaha waxbarashada; 651-387-0869, <a href="https://spps.org/fsx">spps.org/fsx</a></p> <p><b>St. Paul Parks and Recreation:</b> Xarunta carruurta ku ciyaarto ee Rec Check iyo S'more Fun; <a href="https://stpaul.gov/reccheck">stpaul.gov/reccheck</a></p>	<p><b>Maalinta Saacadaha Dheeraadka ah ee Waxbarashada (EDL):</b> taageerada tacliinta iyo hawlaha waxbarashada; <a href="https://spps.org/alted">spps.org/alted</a></p> <p><b>Flipside:</b> hawlaha kobcinta ee farshaxanka, sayniska, tikniyoolajiyadda iyo kuwo kaloo badan; 651-767-8179, <a href="https://spps.org/flipside">spps.org/flipside</a></p> <p><b>Freedom School Express:</b> duruusta dhaqan ahaan habboon iyo hawlaha waxbarashada; 651-387-0869, <a href="https://spps.org/fsx">spps.org/fsx</a></p> <p><b>Arrimaha ciyaaraha fudud ee iskoollada dhex maro iyo cayaaro ardayda qaarkood loogu talagalay:</b> 651-767-3490, <a href="https://spps.org/sports">spps.org/sports</a></p>	<p><b>Arrimaha ciyaaraha fudud ee iskoollada dhex maro iyo cayaaro ardayda qaarkood loogu talagalay:</b> 651-767-3490, <a href="https://spps.org/sports">spps.org/sports</a></p> <p><b>Booqo bogga iskuulkaaga si aad u hesho hawlo badan oo ka socdo sida:</b> tiyaatarka, naadiyada ardayda, fursadaha hoggaaminta iyo hawlo kale oo waxbarashada ka baxsan</p>

# Diyaargarowga Kulleejka iyo Xirfadda Shaqada

## Waxbarashada Shaqada Xirfadaysan iyo Farsamada

Fasallada barnaamijkan (CTE) waxay u diyaariyaan ardayda xirfadaha aagagga leh mushaharka sare oo bulshaduna baahi u qabto: beeraha, baabuurta/gaadiidka, sayniska qoyska iyo macaamiisha, waxbarashada, isgaarsiinta iyo tikniyoolajiyadda, dhismaha, wax soo saarka, iyo ganacsiga caafimaadka. Barnaamijyadan waxay u oggolaanayaan ardayda inay khibrad u helaan xirfado badan iyaga oo wax sahaminayo, wax ka baranayo dad takhasus leh, iyo in ay billaabaan tababarka shaqada (internship). Ardayda dhammaystirta koorsooyinka CTE waxay heli karaan dhibcaha kulleejka, shahaadooyinka warshadaha, iyo shahaadooyin kale.

## Isdiiwaangelin Labo Meel ka Wada Socoto

Koorsooyinka leh is-diiwaangelinta labo meel ka kala socdo waa koorsooyin kulleej ah oo ay barayaan macallinka dugsiga sare ee u qalmo macallinnimada koleejka. Ardayda qaadata koorasyada iyagoo labo meelood ka diiwaangashan waxay heli karaan dhibcaha dugsiga sare iyo kuwa kulleejka iyada oo aysan wax kharash ah kaga bixin ardayga.

## Fursadaha Tacliinta Sare ee Kulleejka (PSEO)

Koorsooyinka Is-diiwaangelinta Dugsiga Sare ka dib (PSEO) waxaa dhigo macalimiinta kulleejada. Inta badan waxaa lagu qaadaa xarumaha kulleejka ama qaab online ah. SPPS waxay kaloo bixisaa koorsooyin PSEO ah, oo lagu magacaabo PSEO qandaraas ahaan, oo lagu barto dugsiyadeena sare iyo barnaamijka Dariiqa Xirfadda Shaqada SPPS. PSEO waxay u oggolaaneysaa ardayda u qalma fasallada 10-12 inay iska diiwaangeliyaan koorsooyinka kolleejada oo ay helaan dhibco shahaadadooda dugsiga sare iyo shahaadada koleejka.

## Dariiqaada Loogu Diyaargarooob Xirfadda Shaqada

Dariiqa Shaqada Xirfadeysan waa koorsooyin taxane ah oo loogu talagalay ardayda fasalka 9-12 oo ku qotoma barnaamijyada dugsiga sare ka dib. Koorasyadu waxay ardayda u diyaariyaan fursado kala duwan oo dhammaystiran oo la bixiyo dugsiga sare ka dib kuwaasoo ku aaddan shaqooyin aad baahi loogu qabo, lehna mushahar sare. Barnaamijyada Dariiqa Shaqada Xirfadaysan waxay ardayda siiyaan fursado ay ku kasbadaan dhibcaha koleejka, shahaadooyinka iyo aqoonsi tacliineed, iyo inay ka qayb qaataan tababarka shaqo ee ardayga, tababarka shaqada ee shaqaalaha iyo sahaminta shaqada xirfadaysan iyada oo loo marayo iskaashi lala yeesho warshadaha.

Wax badan ka baro barnaamijyada u diyaargarowga kolleejada iyo shaqada xirfadeysan oo booqo [spps.org/OCCR](http://spps.org/OCCR).

# Barnaamijka Barashada Luuqadda Ingiriiska

## Barnaamijyada Barashada Ingiriisiga ee English Learner (EL)

Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul waxay bixiyaan horumarinta luuqadda Ingiriisiga iyo waxbarashada ardayda luuqaddooda aan Ingiriisiga ahayn (kuwaasoo qiyaastii ah boqolkiiba 30 ardayda SPPS).

**U Qalmidda:** Inta lagu jiro nidaamka isdiiwaangelinta, xogo ayaa laga uruuriyaa asalka luuqadda ardaygu ku hadlo. Ardayda waa la qiimeeyaa si loo go'aamiyo haddii ay u qalmaan adeegyada Barashada Ingiriisiga (EL) iyadoo la adeegsanayo qodobada shuruudaha uu gobolku go'aamiyay.

**Waxbarista:** Ardayda u qalma barnaamijkan waxay heli doonaan duruus dheeraad ah oo diiradda lagu saarayo kor u qaadista xirfadaha luuqadda Ingiriisiga ee ardayga iyo fahamka maadada loo dhigayo. Waxbarashada waxaa lagu qaataa qaab ah macallimiin si wadajir ah wax u wada barto ardayga iyo bixinta maaddooyinka asaasiga ah oo ku baxo af-Ingiriisiga (sida xisaabta, sayniska, farshaxanka luqadda iyo taariikh iyo juquraafiga). Horumarka ardayga waxaa lagu cabbiraa iyadoo lagu saleynayo waxqabadka ardayga ee qiimayn sanadle ah oo jaango'an.

**Ka bixitaanka:** Sannad walba, horumarka tacliin ee ardayga ayaa la cabbiraa si loo go'aamiyo aqoontiisa luuqadda Ingiriisiga. Marka ardaydu buuxiso shuruudaha uu go'aamiyay gobolka, way ka bixi karaan barnaamijka.

## Machadka Luuqadda

Carruurta ku cusub waddanka ee u baahan in ay soo kobciyaan tacliintooda luuqadda Ingiriisiga, waxay leeyihiin khiyaar ay ku heli karaan adeegyada Akademiyada Luuqadda oo si gaar ah loogu talagalay ardayda dalka ku cusub. Ardayda fasallada 1-aad ilaa 12-aad waxay taageero dardar-gelin ah ka helaan macallimiinta dhiga Ingiriisiga ee la shaqeeyo macallimiinta kale ee waxbarashada guud si loo xaqiijiyo in Ardayda Barata af-Ingiriisku ay manhajka asaasiga ah iyo halbeegyada tacliinta wax uga baran karaan si macno u sameynayso iyadoo maanka lagu hayo baahidooda ku aaddan dhanka caawinta luuqadda. Wixii xog dheeraad ah, booqo [spps.org/ml](http://spps.org/ml) ama wac 651-767-8320.

# Barnaamijyada Carruurnimada Hore

SPPS waxay bixisaa barnaamijyo laga soo bilaabo dhalashada ilaa Pre-K si ardaydeena aadka u yaryar loogu diyaariyo inay guulo ka keenaan dugsiga. Fursadaha waxbarashada dhallaanka waxaa laga heli karaa inta badan xaafadaha St. Paul, iyadoo fasalada Waxbarashada Qoyska ee Carruurnimada Hore (ECFE), Waxbarashada Gaarka ah ee Carruurnimada Hore (ECSE) iyo Dugsiga Barbaarinta Kahor laga bixiyo dugsiiyo badan degmada oo dhan. Xarunta Carruurnimada Hore Degmada oo Dhan iyo Garabka Carruurnimada Hore ee Dugsiga Hoose ee Bruce Vento ay barnaamijyo kala duwan ka bixiyaan goob kasta, oo ay ku jiraan ECFE, ECSE, Pre-K iyo adeegyada kale iyadoo loo marayo iskaashiyo bulsho.

## Waxbarashada Qoyska ee Carruurnimada Hore (ECFE)

Waxbarashada Bulshada SPPS waxay bixisaa waxbarashada waalidka iyo dhallaanka laga bilaabo dhalashada ilaa gelitaanka kindergarten. Xiisadaha waxaa lagu dhigtaa goobo badan St. Paul oo dhan. Xiisadaha oo dhan waxay ka kooban yihiin saddex qaybood: wakhtiga wadajirka ah ee waalidka iyo ilmaha, wakhtiga waalidka iyo wakhtiga ilmaha. Wixii xog dheeraad ah, booqo [spps.org/ecfe](https://spps.org/ecfe) ama wac 651-793-5410.

## Waxbarashada Gaarka ah ee Carruurnimada Hore (ECSE)

Barnaamijka Birth to Three Early Intervention wuxuu bixiyaa adeegyo sannadle ah oo aan kharash looga baahnayn qoysaska. Qorshaha Adeegga Qoyska Shakhshi ahaaneed (Individualized Family Service Plan - IFSP) waxaa la dejiyaa iyadoo lagu saleynayo waxa uu waalidka u arko inay mudnaan u tahay horumarka ilmahooda. Adeegyada waxay ka baxaan goobaha caadiga ah ee guriga, goobta ECFE ama xarun xannaanada carruurta ah. Adeegyada Waxbarashada Gaarka ah ee Carruurnimada Hore (ECSE) ee loogu talagalay carruurta jirta 3- ilaa 4-sano-jir waxaa lagu siiyaa fasalada Pre-K (da'da 4), fasalada ECSE, xannaanada maalinta ee bulshada ama goobaha dugsiga barbaarinta hore, ee ku yaalla ECFE, Head Start ama guriga. Wixii xog dheeraad ah, booqo [spps.org/ecse](https://spps.org/ecse) ama wac 651-744-5661 (Wax Ka Qabashada Hore) ama 651-744-8094 (ECSE).

## Xarunta Carruurnimada Hore ee Degmada oo Dhan

Xarunta Carruurnimada Hore ee Degmada oo Dhan waa barnaamij takhasus oo adeegyo kala duwan siya carruurta laga bilaabo dhalashada ilaa da'da 5 jir si loo daboolo baahiyaha gaarka ah ee canug kasta iyo qoyska. Adeegyada waxaa ka mid ah ECFE, ECSE, Pre-K iyo iskaashiyada bulshada sida caafimaadka dhimirka ee carruurnimada hore. Barnaamijka wuxuu bixiyaa fursado loogu talagalay waalidiinta yaryar inay ku dhisaan cilaqaad waxbadana uga ogaadaan koritaanka ubadkooda. Wixii xog dheeraad ah, booqo [spps.org/ech](https://spps.org/ech).

## Baaritaanka Hore ee Carruurnimada

Baaritaanka Carruurnimada Hore (Early Childhood Screening) wuxuu ka caawiyaa iskoolka inay ogaadaan baahiyaha caafimaadka iyo horumarka ee carruurta yaryar ka hor inta aysan galin fasalka kindergarten. Baaritaankan waa mid ay dooneyso Dowladda Gobolka Minnesota si ardaygu u galo fasal kindergarten ah ee dugsiyada dadweynaha. Baaritaanka waa lacag la'aan oo waxaana loo heli karaa carruurta da' doodu tahay

3-5 sano jirro. Mudnaanta waxaa la siinayaa carruurta ku nool Saint Paul. Wixii xog dheeraad ah, booqo [spps.org/studentwellness](https://spps.org/studentwellness) ama wac 651-632-3746.

## Barnaamijka Dabecadda ee Nature Discovery Pre-Kindergarten

Barnaamijka Nature Discovery Pre-Kindergarten wuxuu bixiyaa xiisado Pre-K oo lacag ah, nis-gelin ama maalinta dhan ah iyadoo diiradda lagu saarayo wax ku barashada goob ku salaysan deegaanka dabiiciga ah. Barnaamijyada waxay ku yaalaan St. Anthony Park Elementary iyo Xarunta Waxbarashada Bulshada ee ku taasho J.J. Hill. Kaalmada khidmadda dugsiga waxaa heli kara qoysaska uqalma iyadoo loo marayo Deeqaha Waxbarashada Dhallaanka ee gobolka. Xannaanada carruurta ee saacadaha dugsiga kadib ah waxaa lagu heli karaa Discovery Club. Nature Discovery Pre-K wuxuu u furan yahay carruurta 3 sano ama 4 sano jirsada Sibteembar 1, 2026. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, booqo [spps.org/natureprek](https://spps.org/natureprek).

## Fasallada Pre-Kindergarten (Pre-K)

Barnaamijyada maalinta dhan ah ee Pre-K waxaa laga bixiyaa dugsiyada hoose badankooda iyo Xarunta Carruurnimada Hore Degmada oo Dhan. Carruurta 4 sano jirka ah marka la gaaro Sibteembar 1, 2026, kuna nool St. Paul ayaa uqalma Pre-K.

Carruurta waxaa laga aqbalaa ku qorista barnaamijka Pre-K iyadoo lagu saleysanayo haddii boos loo heli karo. Aqbalidda mudnaanta leh waxaa lagu saleeyaa haddii ardaydu yihiin kuwo barta luuqadda Ingiriisiga; oo ayna u qalmaan dheefaha waxbarashada qaarkood; ama hela adeegyada ECSE. Wixii xog dheeraad ah, booqo [spps.org/prek](https://spps.org/prek) ama wac 651-632-3760.

SPPS waxay shuraako la tahay Head Start si ay u bixiso kuraas dheeraad ah oo Pre-K ah ee iskoolada la doortay. Qoysaska uqalma barnaamijka Head Start waxay la xiriiri karaan Xarunta Meeleynta Ardayda wixii xog dheeraad ah.

## Oggolaanshaha Hore ee Kindergarten

Ardayda dhalashadooda shanaad ay dhacayso inta u dhaxaysa Sibteembar 2 iyo Diseembar 31, 2026, waxay codsan karaan qiimeynta gelitaanka hore ee kindergarten iyagoo u marayo Xarunta Meelaynta Ardayda ee Student Placement Center. Xilliga kama dambaysta ah ee codsiyada waa Febraayo 20, 2026. Ardayda loo oggolaado inay hore u galaan kindergarten waa la qori doonaa iyadoo lagu saleynayo booska bannaan, taasoo dhaceysa kaliya ka dib markii dhammaan ardayda kale ee u qalma kindergarten la meeleeyo. Qoysaska waxaa sidoo kale lagu dhiirrigelinayaa inay codsadaan barnaamijka Pre-Kindergarten si xilli hore looga qoro kindergarten. Wixii faahfaahin dheeraad ah, wac 651-632-3760.

# Adeegyada Waxbarashada Gaarka ah

Arday walba oo xaq u leh waxbarashada gaarka ah wuxuu helayaa adeeg ku salaysan baahidiisa shakhsiga ah (IEP). Kooxda waxbarashadiisa gaarka ah (IEP team) oo ay ku jiran waaliddiin ayaa diiradda saaraya sidii loo caawin lahaa ardayda in ay helaan xirfado ay wax ku bartaan, dadka kula dhaqmaan, waxna ku qabsadaan si ay u noqdaan kuwo isku filan intii suurtagal ah. Dugsiyada Saint Paul Public Schools waxay bixiyaan adeegyo buuxa oo kala duwan kuwaasoo loogu talagalay ardayda hela adeegyada waxbarashada gaarka ah kuwaasoo ay ku jiraan barnaamijyo khaas ah oo loogu talagalay ardayda u baahan adeeg nooc sare ah.

Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan waxbarashada gaarka ah ee ilmahaaga, baahiyaha la xiriiro caafimaadka ama dhanka dhaqdhaqaaqa/socodka ardayga ah, fadlan kala xiriir Xafiiska Adeegyada Gaarka ah lambarkan 651-767-8321. Waxaad kale oo aad la xiriiri kartaa maamulaha iskoolka aad dooratay si aad u ogaatid in adeegyada waxbarashada gaarka ah laga heli karo iskoolkaas.

## Adeegyada Waxbarashada Gaarka ah

Dhammaan dugsiyada hoose, dhexe iyo sare waxay adeegyo waxbarasho oo gaar ah siiyaan ardayda ku jirta adeegyada Goobta Federaalka I iyo II sida lagu tilmaamay barnaamijkooda IEP. Dugsiyada oo dhan waxay sidoo kale bixiyaan adeegyada la xiriira sida ku tilmaaman IEP-ga ardayga, kaas oo ay ku jiri karaan:

- Shaqaalaha Bulshada ee Dugsiga (SSW)
- Baxnaanada Shaqada (OT)
- Baxnaanada Jirka (PT)
- Waxbarashada Jirka ee Horumarinta La Qabsiga (DAPE)
- Adeegyada kalkaalinta
- Adeegyada jihaynta iyo wacyigalinta dhaqdhaqaaqa
- Cilmiga Maqalka
- Adeegyada khibrada shaqada (dugsiyada sare oo kaliya)

Ardayda qaba baahiyaha badan (Goobta Federaalka III ee barnaamijkooda IEP) waxay u baahan karaan adeegyo iyadoo loo marayo barnaamij gaar ah qayb ama dhammaan maalinta dugsiga. Barnaamijyada gaarka ah waxay ku yaalaan dugsiyo la xusho degmada oo dhan. Fasalo gaar ah ayaa taageera ardayda qabta naafooyinka kala duwan hal fasal dhexdiisa, kuwaasoo diiradda saaraya baahiyaha gaarka ah ee arday kasta. Haddii IEP uu cayimo in arday uu u baahan yahay Goobta Federaalka III, ardayga waxaa la gayn doonaa dugsi bixiya adeegyadaas. Waalidiinta waxay la shaqayn karaan kooxda IEP-ga ilmahooda si ay waxbadan uga ogaadaan doorashooyinka dugsi ee ku habboon baahiyaha naafada la xiriira ee ilmahooda.

## Goobaha Waxbarashada Gaarka ah

SPPS waxay leeyihiin afar dugsiyo oo gaar ah oo kaliya u shaqeeya ardayda aan baahiyahooda lagu dabooli karin goobaha dugsiyada soo jireenka ah iyo kuwa Goobta Federaalka IV ku leh IEP-gooda. **Ardayda waxaa barnaamijyadaan u gudbiya kooxdooda IEP iyadoo lagu salaynayo baahiyaha gaarka ah ee barnaamijyada xooggan ee la xiriira naafanimadooda.**





	Buundooyinka	Ciwaanka	Wakhtiga Billowga Iyo Dhammaadka
<b>Bridge View School</b> 651-293-8640 • bridgeview.spps.org	K-12	350 Colborne St.	9:30 a.m.-4 p.m.
<b>Focus Beyond Transition Services</b> 651-293-5997 • focusbeyond.spps.org	Ages 18-21	340 Colborne St.	9:30 a.m.-4 p.m.
<b>Journeys Secondary</b> 651-744-1900 • journeys.spps.org	9-12	90 S. Western Ave.	8:30 a.m.- 3 p.m.
<b>RiverEast Elementary and Secondary</b> 651-744-2567 • rivereast.spps.org	K-12	1055 Mackubin St.	8:30 a.m.- 3 p.m.

## Ogeysiis Sannadle ah ee loo Diro Ardeyda Naafada ah

Dugsiyada dadweynaha ama SPPS waxaa ka go'an in ay ardayda degmada ku nool oo dhan u dhigaan Waxbarasho Dadweyne oo Ardayda ku Habboon oo Bilaash ah (FAPE). Ujeeddada SPPS waa in la hubiyo in ardayda naafada ah la aqoonsado, sida ku qeexan Qeybta 504 ee Sharcigii Baxnaaninta ee 1973, iyo in la qiimeeyo si wax kasta loogu qabto sida ugu habboon uguna macquulsan. Wixii xog dheeraad ah fadlan kala xiriir Saint Paul Public Schools 651-603-4946.

# Khariiradda Saint Paul Public Schools


## Khariiradda Xulashada Iskoolka iyo Aagga Iskoolka Xaafadda


-  Aagga
-  Iskoolka Aagga Xaafadda
-  Kala-qeybiyaha Xudduudda C Bari/C Galbeed
-  Xudduudaha F1/F2



### Raadi Aaggaaga

Isticmaal khariiradda boggan ku taal ama gal bogga School Finder ee [spps.org/apply](https://spps.org/apply) si aad u aragtid iskoollada deegaankaaga (A-F). Aagga ardaygu deggan yahay waxaa loo isticmaalaa goob ahaan meelaha iskoollka looga imaanayo si qoysaska looga caawiyo inay helaan iskool oo loo go'aamiyo u-qalmitaanka gaadiidka baska.





# Noocyada Iskoolada iyo Barnaamijyada

## Iskoolada Xaafadaha ku Yaalla

Qoysasku waxay jecel yihiin iskoolada xaafaddeenna, halkaas oo ay arday badani ku nool yihiin xaafadda. Ilmahaagu wuxuu qeyb ka noqon doonaa bulsho ah macallimiin, arday, iyo deris diyaar u ah inay taageeraan tallaabo walba oo ay qaadaan.

**Iskoolka Aagga Xaafadda** waa aagga juqraafi ee dugsiga hoose u dhow. Ardayda ku nool gudaha soohdinta Iskoolka Aagga Xaafadda ayaa heli doono mudnaanta diiwaangelinta.

## Iskoolada Magnet ee Heer Deegaan iyo Heer Degmo

Iskoolada ah magnet-ka ee SPSS waa fursad xulasho fiican leh oo loogu talagalay qoysaska raba khibrad dugsi leh takhasus gaar ah. Dugsiyada loo yaqaano Magnet-ka waxay diiradda saaraan maaddooyinka aqoonta aasaaska u ah oo ay ka midka yihiin akhriska, xisaabta, iyo sayniska kuwaasoo xoogga sii saarayo meelo qaas ah sida luuqadaha, cilmiga duulista, STEM ama farshaxanka.

- **Iskoolada magnet-ka ee heer deegaan** waxay u adeegaan Aagag badan
- **Iskoolada magnet-ka ee heer degmo** waxay u adeegaan Aagagga oo dhan

Iskuullada badankooda iyo barnaamijyada magnet-ka ah waxay leeyihiin dariiq diiwaangelin oo taxane ah kaas oo ardayda siinayso hab uu u wato waxbarashada laga billaabo Pre-K ilaa iyo dugsiga sare. Si aad u eegtid dariiqyada isdiiwaangelinta iskoolada, oo aad u ogaatid halka barnaamij walba oo magnet ah laga bixiyo, isha mari shaxda iskoolka ee ku qoran dhammaadka hagahan.

## Barnaamijyada Magnet-ka

### Advanced Placement (AP) (Fasallada 9-12)

Xiisado heerka kulleejka ah iyo imtixaano loogu talagalay ardayda dugsiga sare. Ardayda waxay kasban karaan kiridhitka kulleejka ama meelaynta horumarsan ee koorsooyinka kulleejka iyadoo lagu salaynayo waxa ay ka keensadaan imtixaanada AP.

### Aerospace/Engineering (Fasallada PreK-12)

Waxa si gaar ah ardayda loo baraa maaddooyinka la xiriira habka diyaaradaha iyo injineernimada, taasoo ay u sii dheer tahay baridda wax soo saarka heerka dugsiga sare ah.

### Afrikaanka ku salaysan (Fasalada PreK-5)

Barnaamij takhasus oo cusub oo furmayo dayrta 2026; oo diiradda saaraya waayaha Afrikaanka Maraykanka, taariikhda iyo dhaqanka, iyo kordhinta natiijoyinka waxbarasho.

### American Indian Language and Culture (Fasallada PreK-12)

Waxaa lagu bartaa taariikhda, luuqadda, dhaqanka, farshaxanka iyo waxay qiimayso qowmiyadda American Indian-ka ah.

### Arts (Fasallada PreK-12)

Ardaydu waxay bartaan iyada oo laga eegayo dhanka is-dhexgalka farshaxanka iyo maaddooyinka aasaasiga ah iyo fasallada guud, iyo sidoo kale waxay leeyihiin fursado ay ku kobcin karaan xirfadahooda farshaxanka shaqsiyadeed ee qaar ama dhammaan aagagga farshaxanka ee ay ka mid yihiin qoob-ka-ciyaarka, muusikada, tiyaatarka iyo/ama farshaxanka muuqaalka iyo warbaahinta.

### BioSMART (Fasallada PreK-12)

Barnaamijyada wuxuu diiradda saaraa sayniska kaasoo isku dhafo waxbarashada noocyadeeda oo dhan iyo tiknoolajiyada. Fasallada 6-12, ardaydu waxay qaataan laba fasal oo ah saynis/injineernimo sannad walba.

### East African Language and Culture (Fasallada PreK-8)

Ardayda waxay sahmiyaan dhaqamada iyo luuqadaha Bariga Afrika: Amxaari, Carabi, Oromo, Soomaali, Sawaaxili iyo Tigrinya. Maaddooyinka aasaasiga ah waxaa lagu dhigtaa Ingiriisi. Ardaydu waxay bartaan sida loo akhriyo, loo qoro, looguna hadlo luuqadaha Bariga Afrika iyagoo qaadanayo fasal luuqaddaas ah.

### Deegaanka (Fasallada PreK-5)

Waxbarid gaar ah oo diiradda saaraysa ku dhiirigelinta ardayda inay sahmiyaan, baaraan, bartaan oo kobciyaan ciyaarta iyadoo la horumarinayo xiriir lala yeesho deegaanka dabiiciga ah.

### Environmental Science (Fasallada 6-12)

Waa barashada gaarka ah oo diiradda saaraysa barashada cilmiga sayniska bey'adda, oo ay ku jiraan khibradaha ka baxsan goobaha fasalka caadiga ah.

### E-STEM (Fasallada 6-8)

Tacliinta bey'adda iyadoo lagu eegayo sayniska, tiknoolajiyadda, injineernimada iyo xisaabta.

### Expeditionary Learning (Fasallada 6-12)

Waxbarasho salka ku hayso mashruucyo uu ardaygu khibrad ahaan wax uga baranayo gudaha fasalka iyo bulshada.

### Maaliyadda, Akademiya (Fasallada 9-12)

Waxbarid gaar ah oo diiradda lagu saarayo ganacsiga iyo maaliyadda oo heerka dugsiga sare ah.

### French Dual Language Immersion (Fasallada PreK-12)

Kani waa barnaamij hal jiho ku socdo luuqad ahaan oo ardayda waxaa wax lagu baraa luuqadda Faransiiska si ay u noqdaan kuwa akhriyi kara, qori kara, kuna hadli kara Faransiis iyagoo isla markaana baranayo imtixaanada heerka gobolka. Ardayda dhigata dugsiga dhexe iyo sare waxay si qoto dheer u fahmaan luuqadda iyo dhaqanka Faransiiska iyagoo sii wadanayo barashada luuqadda. Shuruudaha lagu dhigan karo barnaamijkan: In ardaygu ku qoran yahay barnaamij af-Faransiiska iyo Ingiriiska wax lagu barto ama qiimaynta aqoonta luuqadda Faransiiska dadka dib ka imaanaya (fasalka 2 iyo wixii ka sarreeya).

### **German Dual Language Immersion (Fasallada 9-12)**

Ardayda waxaa la baraa Af-Jarmal si ay u bartaan, ugu akhriyaan, ugu qoraan isla markaana ugu xiriiraan luuqadda Jarmalka waxna uga bartaan dhaqanka Jarmalka. Shuruudaha lagu dhigan karo barnaamijkan: In ardaygu hore uga diiwaangashanaa barnaamijka wax lagu barto luuqadda Jarmalka ama qiimaynta aqoonta luuqadda Jarmalka ee ardayga gadaal ka yimid.

### **Hibo iyo Karti (Fasalada 1-8)**

Waxbarid horumarsan oo loogu talagalay ardayda leh awoodaha horumarsan ee mid ama in ka badan oo ka mid ah aagaga soo socda: garaadka guud, maadooyinka tacliinta gaarka ah, hal-abuurka, hoggaanka, iyo farshaxanka muuqda iyo bandhigga. Qiimaynta ayaa looga baahan yahay fasalada 1-5, oo ay ku jiraan Tijaabada Awoodaha Garaadka (CogAT 7), qiimaynta faylalka ama aqoonsi hore in ardaygu yahay barte horumarsan.

### **Hmong Dual Language Immersion (Fasallada PreK-12)**

Waa barnaamij ardaydu wax ku barato af-Ingiriiska iyo Hmong iyadoo isla markaana si fiican u baranayo imtixaannada heerka gobolka. Ardayda dhigata dugsiga dhexe iyo dugsiga sare waxay si qoto dheer u fahmaan luuqadda iyo dhaqanka Hmong iyadoo sii wadanayo barashada luuqadda. Shuruudaha lagu dhigan karo barnaamijkan: Waa inuu ardaygu ku jiraa fasalka Hmong Dual Language Immersion ama inuu qaato qiimaynta aqoonta luuqada Hmong ee ardayga gadaal ka yimid (fasalka 2 iyo wixii ka sarreeya).

### **Luuqada iyo Dhaqanka Hmong (Fasallada 6-8)**

Ardaydu waxay bartaan dhaqanka, luuqadda, taariikhda, iyo caadooyinka dadka Hmong. Maadooyinka aasaasiga ah waxaa lagu dhigaa af-Ingiriis iyadoo lagu darayo taariikhda iyo dhaqanka Hmong fasallada dhammaan. Ardaydu waxay bartaan sida loo akhriyo, qoro, oo loogu hadlo af Hmong iyadoo qaadano fasal luuqaddaas ah.

### **Daraasaadka Hmong (Fasallada K-5)**

Ardaydu waxay sahaniyaan dhaqanka, luuqadda, taariikhda, farshaxanka, sheeko-xariirta, suugaanta, iyo caadooyinka dadka Hmong iyadoo qaadano duruusta taariikhda iyo juquraafiga. Duruusta dhammaan waxaa lagu qaataa Af-Ingiriis.

### **International Baccalaureate (IB) (Fasallada PreK-12)**

Waa barnaamij laga aqoonsan yahay caalamka oo bixiya waxbarasho xujaynaysa ardayda oo diiradda saarta caalamka. Ardayda dhigata PreK-5 waxay kaqaybqaataan Barnaamijka Sanadaha Hore, fasalada 6-10 waxay kaqaybqaataan Barnaamijka Sanadaha Dhexe, halka fasalada 11-12 ay kaqaybqaataan midkood Barnaamijka Xirfadda Shaqada ama Barnaamijka Dhibloomada.

### **Luuqada iyo Dhaqanka Karen (Fasallada K-2)**

Ardayda waxay sahaniyaan luuqada iyo dhaqanka Karen. Maadooyinka aasaasiga ah waxaa lagu dhigtaa Ingiriisi. Ardaydu waxay bartaan sida loo akhriyo, loo qoro, looguna hadlo af Karen iyadoo qaadano fasal luuqaddaas ah. Barnaamijkan cusub wuxuu sannad walba ku dari doonaa fasal cusub.

### **Mandarin Chinese Dual Language Immersion (Fasallada K-12)**

Kani waa barnaamij hal jiho ku socdo luuqad ahaan oo ardayda waxaa wax lagu baraa luuqadda Mandarin ee Shiinaha si ay faham sare ugu yeeshaan akhriska qoraalka, iyo wadahadalka isla markaana si fiican u baranayo imtixaannada heerka gobolka. Ardayda dhigata dugsiyada dhexe iyo sare waxay si qoto dheer u fahmaan luuqadda iyo dhaqanka Mandarin Chinese iyadoo sii wadanayo barashada luuqadda. Shuruudaha lagu dhigan karo barnaamijkan: Waa inuu ardaygu ku jiraa fasal labu barto labada luuqadood ee af-Ingiriiska iyo af-Mandarin Chinese ama qiimaynta aqoonta luuqadda Mandarin ee ardayga gadaal ka yimid (fasalka 2 iyo wixii ka sarreeya).

### **Montessori (Fasallada PreK-5)**

Ardaydu waxay wax ku bartaan fasalo da'o badan ka kooban si ay u dhisaan madax bannaani iyo kalsooni iyadoo adeegsanaya kheyraad baraatiko ah oo gaar ah. Waxbaristu waa mid shakhsiyadaysan si looga caawiyo arday kasta inuu kobco iyadoo lagu salaynayo baahiyahooda.

### **Online Learning (Fasallada K-12)**

Ardaydu waxay wax ku baranayaan gabi ahaan onlayn ahaan iyadoo ku jiro jawi waxbarasho oo dabacsan oo taageero sare leh. Ardayda waxay ku lug yeeshaan waxbarasho toos ah iyo mid duuban.

### **Science (Fasallada PreK-5)**

